

Meey 13, 2020

Qoysaska Qaaliga ah ee Dugsiyada Dadweynaha Boston:

Bilaawga bishan, qoys walba oo ka tirsan Dugsiyada Dadweynaha Boston (BPS) waxaa la siin doonaa kaalmada maaliyadeed cuntada sababta ah safmarka Hergebka-dabeysha awgiis. Qarashaadkani waxaa lagu heli karaa barnaamij cusub oo loo yaqaan safmarka EBT (Safmarka Wareejinta Faa'iidooyinka Elektiroonigga ah) ama P-EBT.

Maaddaama BPSay siiso cunooyin bilaash ah ardayda oo dhan, cunug kasta oo dhigta BPS wuxuu u qalmaa inuu helo maaliyad P-EBT. **Waxaad heli doontaa \$ 5.70 cunug kasta oo u qalma**, Maalinti ee maalin kasto oo dugsiyada la xiro sababaha safmarka, ama \$28.50 usbuucii.

Hadii aadan hada haysanin kaarka EBT, waxaad **heli doontaa kaarka P-EBT ee boostada Meey gudaheeda ee cinwaanka guriga oo ku yaal faylka cunugaaga dugsiga**. Ilmo kasta oo ka diiwaangashan BPS ee guriga wuxuu heli doonaa kaarka P-EBT u gaar ah. Haddii aad hada haysato kaarka EBT, lacag ayaa laguugu dari doonaa akoonkaaga. Kaarku wuxuu shaqeynayaa hal sano oo buuxda, oo lacagta waxaa loo isticmaali karaa in lagu iibsado alaabada cuntada dukaamada ay ka heli karaan SNAP (Gargaarka cuntada) ayaa la aqbalaa (raadi astaamo dhahaya "Waan aqbalnaa EBT halkan"). Qoysaska looma baahna inay isticmaalaan lacagaha P-EBT. Macluumaad dheeri ah, fadlan booqo www.MAP-EBT.org ama la xiriir food@boston.gov.


MUHIIM: Isticmaalka kaarkaaga P-EBT wax saameyn ah kuma yeelan doono adiga iyo xaaladda socdaalka cunugaaga. Qaanuunka dawlaha ahi ma khuseeyo barnaamijkan.

Haddii aadan qarashaad helin bartamaha bisha Meey ama aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan wac Mashruuca Bread Leenka Ilaha Cuntada ee 800-645-8333. Leenka Ilaha Cuntada wuxuu u furan yahay dhammaan dadka deggan Massachusetts, iyadoo taageero laga helayo 160 luqadood. Wac 800-645-8333 si aad u ogaato sida aad ugu heli karto taageero cunto oo dheeri ah qoyskaaga waqtigan.

Magaalada Boston ayaa bixisa [cuntada bilaashka ah ee qoysaska](#) maalin walba, oo laga heli karo 65 meelood oo magaalada ah. [BPS waxay leedahay 17 shabako](#) oo leh quraac iyo qado bilaash ah ayaa diyaar u ah qaadista Isniinta - Jimcaha, 8: 30-11: 30 am. Waad isticmaali kartaa kaarka P-EBT waxaadna ku sii wadi kartaa cunnada goobta.

Fadlan sii wad inaad ku celceliso ka fogaanshaha bulsho oo badbaado leh oo xiro wejiga daboorka inta aad bannaanka joogtid. Booqo bostonpublicschools.org/coronavirus wixii ilo macluumaad dheeri ah iyo warbixin. Waan ognahay inay waqtiyadaan adag yihiin, waxaana u joognaa inaan ku taageerno. Caqabaddaan layaabka leh ayaa bulshadeena ka dhigaysa mid sii xoogeysaneysa illaa iyo inta aan sii wadno wada shaqeynta.

Nabad ku joog iyo caafimaad qab.



Dr. Brenda Cassellius
Kormeeraha guud